NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.℠

Helping Hand™

Amaanka Baatariga Badhanka ah (Button Battery Safety)

Waxyaalaha lagu isticmaalo guriga ayaa kuwo aad u badan waxana ku jira baatariga badhanka ah (Sawirka 1). Waxyaalahaas waxa ka mid ah: kantaroolada TVga, xummad-sheegayaasha (thermometers), cayaaraha elektaroonikada ah (games), waxyaalaha lagu ciyaaro (toys), kaaliyayaasha maqalka (hearing aids), xisaabiyaasha elektaroonikada ah (calculators), miisaannada musqusha (bathroom scales), kaararka salaanta ee muusikada ah (musical greeting cards), furayaasha baabuurta ee elektaroonikada ah (key fobs), silsiladaha, dhegadhegaha amase xilqadaha iyo faraatiyaasha elektaroonikada ah (electronic jewelry), qurxiyayaalka xilliga fasaxa (holiday ornaments), kamarooyinka iyo mushamacyada (candles). Marka ay teknoolajiyadu sii fiddoba, waxa sii badanaya waxyaalaha iyo qalabka aan isticmaalno maalin kasta – iyo baatariyaasha ay waxyaalahaasi ku shaqeeyaan.

Sawirka 1 Waxyaalaha leh baatariyada badhanka ah

Baatariyada Badhanka ahi waa kuwo yaryar (Sawirka 2). Waxa laga yaabaa inay le'eg yihiin qiyaasta kiniiniga amase lacagta qaddaadiicda ah. Maaddaama ay yaryar yihiin, waxa fudud in la liqo amase la galiyo sanka amase dhegta. Marka baatari badhan ah la galiyo jirka, wuxuu baatarigaasi sii daayaa mowjad koronto ah oo wuxuu bilaabaa inuu jirka gubo. Waxa jirka ku dhici kara dhaawac xoog badan muddo ka yar 2 saacadood. Haddii uu dhaawacu aad u xun yahay waxa laga yaabaa in loo baahdo qalliin. Dad ayaa ku dhintay gubniinka ay keeneen baatariyada badhanka ah ee ay liqeen.

Sawirka 2 Baatariyaal badhan ah oo le'eg qiyaasta toban santi

Waxaad U Feejignaataa Kuwan

Haddii ilmahaagu liqo baatariga badhanka ah, waxa laga yaabaa in lagu arko dareennada soo socda:

- Qandho
- Xanuun hunguri
- Xasaasiyad
- Matag amase Hunqaaco
- Diidmo cunto amase cabbitaan

Xuquuqda Xafidisan (Copyright 2012), Nationwide Children's Hospital

Haddii ilmahaagu sankiisa iyo dhegtiisa galiyo baarati badhan ah, waxaad u feejignaataa dareennada soo socda:

- Qandho
- Xasaasiyad
- Deecaan ka yimaadda dhagaha amase sanka
- Xanuun amase barar xagga dhagaha amase sanka

Marmar ma jiraan wax astaamo amase calaamado ah.

Waxa aad Qabaneyso

Haddaad u maleyso in ilmahaagu liqay amase galiyey sankiisa amase dhegtiisa baatari badhan ah: **WAXAAD SI DEGDEG AH U TAGTAA QOLKA DAAWEYNTA DEGDEGGA AH (EMERGENCY ROOM)**. Waxa kale oo aad wici kartaa Xarunta Sunta ee 1-800-222-1222. Qofka **Ha Ku Qasbin** inuu matago amase wax cuno amase cabbo. Ilmahaagu waxa caadi ahaan laga qaadi doonaa Raajo (X-ray) si loo xaqiijiyo in baatarigu ku dhex jiro jirka. Haddii uu baatarigu ku dhagsan yahay jirka, sida qura ee loo joojin karo daawac sii dhaca waxay tahay in baatarigaas laga saaro jirka.

Ku-sugnaan Amaan

- Waxaad raadisaa shey kasta oo ku shaqeeya baatari ee yaalla guriga dhexdiisa iyo hareerihiisa iyo goobta ilmahaagu joogaan. Waxaad hubisaa in baatarigu sugan yahay, oo lagu gaari karo oo qura marka la isticmaalo qalab sida kaashawiito(screwdriver). Haddii aanay taasi suurtagal ahayn, qalabka elektaroonikada ah ka fogee meel ay ilmahaagu arki karaan oo ay gaari karaan.
- Qalabka elektaroonikada ah ka fogee meel ay ilmahaagu arki karaan oo ay gaari karaan oo ku xir khaanad amase sanduuq.
- Ilmaha si taxadir leh u illaali marka ay isticmaalayaan waxyaalaha ay baatariyaashu ku jiraan.
- Si dhakhso ah ficil u samee haddii aad ka shakiso in ilmahaagu jirkiisa dhexdiisa galiyey baatari. Waxaad DEGDEG u tagtaa Waaxda Daaweynta Degdegga ah (Emergency Department) ee kuugu dhow.
- Macluumaadkan la wadaag dad kale si uu qof kastaaba ugu sugnaado amaan.

Qoraallo kale oo "Helping Hands" ah

Sumowga iyo Ka-hortagga Sunta (Poisonings and Poison Prevention, HH-IV-30)

Margashada: Amaankeeda iyo Ka-hortaggeeda (Choking: Safety and Prevention, HH-IV-99)

Amaanka Daawada (Medicine Safety, HH-V-157)

Amaanka Guriga ee Ilmaha Yaryar iyo Socod-baradka (Home Safety for Infants and Toddlers, HH-IV-73)